DISCOVER ITS BEAUTY

Qaybta 4aad



# KA JAWAABISTA SU'AALAHA MUHIIMKA AH EE AADANAHA

DR. NAJI IBRAHIM



# Ka jawaabista Su'aalaha Muhiimka ah ee Aadanaha

Islaamku si waadax ah ayuu uga jawaabaya su'aalaha muhiimka ah ee aadanaha, sida:

- Waa maxay runtu?
- Yaa ina abuuray?
- Ilaah ma jiraa?
- Waa kuma Ilaaheena runta ah?
- Waa kuma Rasuulkii u dambeeyay ee Ilaahay soo diray?
- Yey inagu waajib tahay inaynu caabudno?
- Inagu yeynu nahay?
- Maxaynu halkan u joognaa?
- Miyaynu dhimanaynaa mise ma dhimanayno?
- Maxaa dhacaya ka dib marka aynu dhimano?
- Sidee bay noqon doontaa nolosha Aakhiro?
- Waa maxay bar dhammaadka safarkeenu - ma Jannaa Mise Cadaab?
- Sidee baynu ku hanan karnaa degenaansho maskaxeed oo dhab ah, guul, iyo farxad xaqiiqi ah?
- Sidee baynu ku heli karnaa nolol abadi ah oo aan laga dhimanayn?

**Adigoo maskaxdaada iyo qalbigaaga ku haya inaad ogaato xaqiiqada iyo runta, fadlan qoraalkan akhri intaas ka dibna adiguba qiyaas oo qiimee.**


Runta

# Waa maxay Runtu?

Islaamku wuxuu inoo sheegayaa in Allaah, Ilaaha Kelida ah ee Dhabta ah uu abuuray guud ahaan makhluuqa. Ilaahan Wayn oo keliya ayaa abuuray dhammaan Bani Aadanka iyo xayawaanada; dhulka iyo buuraha, badaha iyo webiyada, dhirta iyo kaymaha; qorraxda iyo dayaxa, xiddigaha iyo meerayaasha; maalmaha iyo habeenada. Dhammaan waxyaabaha kale, oo ay ku jiraan kuwa aynu naqaano iyo kuwa aynaan weli baran, waxay ka qayb yihiin abuurkiisa aan soo koobnayn.

Ilaahay ayaa abuuray dhammaan nolosha iyo noolayaasha Dhulka kor saaran, Isaga ayaa abuuray guud ahaan kownka iyo wixii ku guda jira ee ah waqti, isbees, tamar iyo wixii dhacaya. Illaahay ayaa maamula kownka iyo wax kasta oo ku guda jira Isaga ayaana xakameeya oo ka masuul ah wax kasta oo ka dhex dhaca.

Si kastaba ha ahaatee, dadka qaarbaa jiritaankooda u nisbeeya **'nasiib'** ama ***'dabeecadda'***! Innagoo saynis ahaan u hadleyno, aynu qeexno macnaha DABEECADDA! Waa maxay ***'dabeecaddu'***?

Ma igu raacsan tahay in dabeecaddu tahay dhirta; meerayaasha, falag-meerka, iyo xiddigaha; dooxooyinka iyo buuraha; badaha iyo webiyada; dhulka, qorraxda, dayaxa, xiddigaha, iyo waxyaabaha kale? Markaas waxyaabahaasi ma iyagaa is abuuray? Ma iyagaa Bini Aadamka abuuray?

Qur'aanka Sharafta leh ayaa si qurux badan inoogu sheegaya:

***"Dadow caabuda Allihiinna, idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyey, waxaadna mudan tihiin inaad dhowrsataan."*** (2:21)

***"Ilaahay ayaa abuuray samooyinka iyo dhulkaba si dhab ah."*** (39:5)

***"Alle waa kan abuuray habeenka iyo maalinta, qorraxda iyo dayaxa."*** (21:33)



Badanaa, dadka aaminsan in dabiicad keliya jirto waxay ku doodaan in ay Ilaahay u rumeyn waayeen maadaama aanay arki karayn, taaban karayn ama aanay tijaabo ku sameyn karayn!

Laba sannadood ka hor, gobolka Oregon, ee Maraykanka, waxa gurigayga igu soo booqday oday duqa ah oo aanu daris nahay. Waxyaabo dhowr ah oo ay fikradda Ilaahnimadu ka mid tahay ayaanu ka sheekaysanay. Isagoo diidan jiritaanka Alle, wuxu gacanta ku garaacay miiskii shaaha, isagoo si qiiraysan u leh "Kan ayaan aaminsanahay maadaama aan taaban karo... Aan dareemi karo!" Aniga oo u caqli celinaya, ayaan u tilmaamay laambad qolka ku jirtay oo waydiiyay, "Ma aaminsan tahay korontada?" Wuxu ku jawaabay, "Hubaashii." Waxaan waydiiyay, "Ma arki kartaa tamarta ama awoodda soo saartay ilaysakan?" "Maya," ayuu ku jawaabay. Waxaan sii waydiiyay, 'Miyaad waligaa indhahaaga ku aragtay ku aragtay hawada aynu neefsanayno? Dareemayaal ma leedahay? Waa maxay midabyadoodu, qaababkoodu, iyo cabbiradoodu? Waa maxay hurdadu? Waa maxay midabkeedu ama miisaankeedu? Immisa shay ayaynu aaminsan nahay inay jiraan innaga oo aynaan dhab ahaantii arkin?"

Dhacdo kale, nin dhalinyaro ah oo Kiris la dhaho iyo xaaskiisa ayaan kula kulmay huteel ku yaalla Oslo, Noorway. Annagoo si saaxiibtinimo leh isaga sheekaysanayna, ayaan Kiris waydiiyay, "Markaas, waa maxay ujeedada noloshu?" Isagoo yaaban, ayuu ku sasay, "Weligayba hadda ayaa iigu horraysay inaan su'aashan maqlo!" Wuxuu sii raaciyay, "Waxaan u maleynayaa in aanay noloshu wax macno iyo ujeed ah lahayn," wuxuuna ku soo gebogebeeyay "Ma aaminsani inuu wax Ilaah ahi jiro." Waxaan weydiiyay sababta, wuxuu ku sharraxay, "Maan arkin weli." Anigoo ka falcelinaya jawaabtiisa, ayaan weydiiyay (anoo dhoolacaddaynaya), "Ma jeceshahay xaaskaaga? Toos ama jir ahaan ma u arki kartaa jacaylkan? Waa maxay midabka jacaylkaagu?




Innagoo ku miisaamayna isla xikmaddan, in aynaan Ilaahay arki karayn (sababtoo ah aqoonteena iyo dareemadeena ayaa xaddidan, mana fahmi karaan Weynida Allaah), waa in aanay innagu riixin inaynu dafirno Jiritaankiisa.

Jiritaanka Alle wuxu ka muuqdaa oo si fudud looga dheehan karaa astaamaha iyo caddaymaha bilaa tirada ah ee ka muuqda abuuritaanka atamyada, unugyada, nudaha, iyo muruqyada bilaa tirada ah, iyo qof kasta iyo wax kasta oo kale ee uu abuuray.

Kumanaan Rasuul oo Alle soo diray (kuwaas oo keliya qaar aynu magacyadooda naqaano) iyo balaayiinka qof ee raacay intii taariikhda aadumuhu soo jirtay, ayaa inoo xaqiijinaya jiritaanka Alle. Macquul ama maangal ma tahay in la iska indho tiro markhaatiga iyo caddaynta ka muuqata astaamaha iyo dadkaas tiro-beelka ah, iyadoo laga doorbidayo 'sayniska' keligii, iyadoo xaqiiqo ahaan aragtiyaha saynisku sharraxaan keliya kownka oo aanay marnaba iswaydiin waxa ama cidda abuurtay kownkan ee ka dhigtay sida uu yahay? Xaqiiqo ahaan, saynisku wuxuu caddaynayaa in suurtagalnimada kownkani ku sameysmi karo 'si iskii/jaanis ah' ay dhab ahaantii si maskax-wareerin ah u yar tahay, hadddana 'jaanis' waa sharraxaadda keli ah ee kuwa aan Ilaahay rumaysnayn kaaga sheegi karaan jiritaanka iyo asalka kownka; sida ay la tahay iyaga, **'sidaas ayuu iska noqday'**.

Adigoo tan maskaxda ku haya, fadlan qiime labada aaminaad midka macquulsan: in jaanis indho la' wax kasta ku socdaan, iyo in kownka uu sida uu yahay u yahay sababtoo ah waxaa abuuray oo maamula Allaah (Ilaahay)?

Waa maxay miisaanka jacaylkani?" Sidee bay Kiris iyo xaaskiisu u fal celiyeen? Bal isku day inaad qiyaasto! Sida iska cad, inaan jacaylkan la arki karayn ama si la taaban karo loo cabbiri karayn kama dhigna inaanu jirin ama ma keenayso in la dafiro runnimadiisa iyo jiritaankiisa.



# Ka Feker Su'aalahan

- **Adduunku ma waxaa sameeyay abuure maskax badan, mise si jaanis indho la'aan ah ayuu iskaga sameysmay?**
- **'Sayniska' ama 'aragtida is-gedgeddiga noolaha' miyay beeninayaan jiritaanka Ilaahay?**


Runta iyo xaqiiqada Islaamku waa mid fudud. Waxaa jira Ilaah Keliya, waana Abuuraha iyo Ilaaliyaha kownka (sarreeyee oo kor Ahaaye). Waa in aynaan yeelan cid ama wax ka sarreeya ama xitaa u dhigma Alle. Alle waa Ilaaha Keliya oo run ah isaga ayaana inoo abuuray inaan garano oo Caabudno keligii.

Dadka u caabuda si sax ah, iyagoo si buuxda ugu hoggaansamaya awaamirtiisa, waxaa la gelin doonaa nolosha Jannada ee aan dhammaadka lahayn.

Dhanka kale, kuwa khilaafa Alle, ee raaca hawadooda iyo damacyadooda denbiga ah, ka faa'iidaysta ee dulmiya dadka kale, waxaa loo kaxayn doonaa dhanka... Hagaag, xagee baad filaysaa in la geyn doono?

Waxaynu raaxo iyo degenaansho maskaxeed oo dhab ah ku heli karnaa inaan rumayno oo u hoggaansano Ilaahay Allaha Kelida ah ee runta ah.




الله أكبر
Ilaahay Baa Weyn

# Waa kuma Ilaaha Runta ah?

Islaamku su'aashan muhiimka ah si waadax ah oo qurux badan ayuu uga jawaabay, wuxuna daaha ka fayday tafaasiil ku saabsan astaamaha iyo aasaasiyaadka gaarka ah ee Halkan Ilaah ee runta ah. Qur'aanka Sharafta badan wuxuu ina leeyahay:

***Waxaad dhahdaa (Nabiyow): "Alle waa kali (wehelna ma leh). Waana sayid dhammaystiran (oo deeqtoon). Alle wax ma dhalin, isna lama dhalin. Wax la mid ahna ma jiro."*** (112:1-4)

Qoraalka sare waa suurad dhammeystiran oo Qur'aanka Kariimka ah ku jirta. Suuradan cajiibka ah waxa si kooban oo macno buuxa leh u soo gudbinaysa xaqiiqada biyo kama dhibcaanka ah ee Ilaahay, Allaha keliya ee xaqqa ah iyo sifooyinkiisa dhabta ah; waxay si waadax ah uga jawaabaysaa su'aalo muhiim ah oo wareeriya malaayiin dad ah.

Sifooyinka Allaha xaqa ah kaga duwan yahay makhluuqa kale ee sheegta (ama lagu sheego) inay Ilaahay yihiin waa:

- Allahan xaqqa ah waa Abuure, Lama abuurin lamana dhalin.
- Allahan xaqqa ah waa Mid keliya. Ma laha cid la shirko ah ama u dhiganta.
- Allahan runta ah kuma arki karno noloshan Adduunyada.
- Allahan Kelida ah ee Xaqqa ah iskama soo dhigo oo ma yeesho wax ka mida Makhluuqaadkiisa muuqooda
- Allahan Kelida ah ee Xaqqa ah waa mid weligii jiraya; ma dhinto ismana beddelayo. Mar walba waa innala joogaa wuuna inoo joogi doonaa.
- Ma jiraan cid ama wax Allahan Kelida ah ee Xaqqa ah u baahdo, sida hooyo, xaas, wiil; uma baahdo cunto, cabitaan, ama caawimo noocay doonto ha ahaatee. Isaga ayaa makhluuqa kale u baahan yihiin.
- Allahan Kelida ah ee Xaqqa ah wuxu leeyahay sifooyin Isaga u gaar ah. Cid la mid ah ma jirto, mana jiraan wax sifooyin aadame ama xayawaan ah oo loo nisbayn karo.



# Sidee Baynu ku hanan karnaa Deggenaansho Maskaxeed?

Dhab ahaantii, Islaamku wuu aqoonsadaa dabeecadeena dhalanka ah wuuna innooga jawaabay su'aalaheena. Wuxuu la hadlaa nafteena iyo baahiyaheena ruuxiga iyo kuwa maskaxeedba. Alle, maadaama uu og yahay fikradaha iyo siraha ku aasan salka ruuxdeena, maskaxdeena iyo qalbiyadeena, wuxuu inoo soo dejiyay sirtii aan ku heli lahayn degenaansho iyo xasilooni.

Waa kuwan qaar ka mid ah tabaha iyo furayaasha aan ku heli lahayn deggenaansho maskaxeed:

1) Baro Rabigaaga Dhabta ah, Abuuraha ah.

2) Isaga keligii Rumaysnoow.

3) Amarkiis raac oo u hogaansan.

4) Rumee Nebiyadiisa (oo uu ku jiro Nebi Muxammad).

5) Xus Alle oo Xasuusnoow.

6) Cafis ka Dalbo Isaga.

7) Alle Keligiis Caabud.

8) Dadka kale la jeclow waxaad naftaada la jeceshahay.

9) U gacan-furnow dadka kale oo isku day inaad ka farxiso.

10) Noqo qof daacad ah oo Alle ka cabsi leh.



# Gabogabo

Sirahan iyo furayaashan lagu helayo deggenaansho maskaxeed, xasilooni, iyo qanaaco iyo sidoo kale xasilooni nafsi, mid Bulsho, iyo Mid Caalami, waxay ka qayb yihiin Qur'aanka Sharafta leh iyo Axaadiista Nebi Muxammad (nabad iyo naxariista Eebbe korkiisa ha ahaatee).

Gebogebadii, Islaamku wuxuu ka jawaabaya Su'aalaha muhiimka ah ee Aadanuhu iswaydiinayo wuxuuna labadiisa Ilood ee ugu waawayn (Qur'aanka Kariimka ah iyo Sunnaha Nebi Muxammad) innagu barayaa qaabkii aan ku heli lahayn deggenaansho maskaxeed, Farxad, iyo Badbaado oo ah keliya inaan barano oo rumayno Allaah, Ilaaha keliya ee runta ah, una rumayno qaab dhab ah oo laabteena ka soo go'day. Waa inaan sidoo kale rumayo dhammaan Nabiyada dhabta ah ee Ilaahay (oo uu ka mid yahay Nebi Muxammad, NNKH) oo aan raacno hanuunkooda saxda ah, iyo sunnahooda.



# Sharxida Magacyada Muhiimka ah ee Islaamka

**Allaah:** Ereyga Carabiga ee Allaah waa magaca gaarka ah ee Ilaaha Keliya ee Runta ah, Abuuraha ah. Islaamku wuxuu ina barayaa in Ilaahay yahay Ilaaha runta ah ee dhammaan Bini'aadanka. Yuhuudda iyo Carabta Masiixiyiinta ah magacan ***Allaah*** ayay adeegsadaan markay sheegayaan Ilaahay, waana kelmadda Carabiga ah ee la adeegsado marka Ilaahay lagu dhex sheegayo Baybalka.

**Muxammad** (Naxariista iyo nabadgelyada Eebbe korkiisa ha ahaatee): Nebigii ugu dambeeyey ee Ilaaha runta ah ee Allaah, Abuuraha, loona soo diray Aadanaha oo dhan.

**Qur'aanka Sharafta Leh:** Kitaabkii ugu dambeeyay ee uu soo diray Ilaahay, Allaha dhabta ah, laguna soo dejiyay Nebi Muxammad.

**Islaamka:** waa in loo hoggaansamo doonista Allaah oo ah Ilaaha runta ah.

**Muslim:** Qof u hoggaansamay doonista Ilaaha runta ah ee Allaah; oo caabuda isaga keligiis.

**Masjidka (Masjid):** Meel nadiif ah oo loogu talagalay salaadda, halkaas oo ay Muslimiintu inta badan u isticmaalaan salaadda iyo cibaadada.




**ALLAH oo ku qoran Carabi**




**Muxammad oo ku qoran Carabi**



**Qur'aanka Sharafta Leh**



**Muslim baryaya ALLAH (Ilaaha runta ah)**

# Ma xiisaynaysaa inaad wax dheeraad ah sii ogaato?

Haddii aad xiisaynayso inaad ogaato macluumaad iyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan Islaamka, fadlan booqo shabakadayada:

**www.discoveritsbeauty.com**

## Taxanaha Lagu Soo Bandhigayo Quruxda Islaamka:

**1. Kaliya Tallooyinka Aysbaaga**

**2. Diinta Aadam Iyo Xaawo**

**3. ABC-yada Islaamka**

**4. Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha**

**5. Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay**

**6. Waxyigii Ugu Dambeeyay**

**7. Rasuulkii Ugu Dambeeyay**

## Shabakado IslaamI Ah Oo Faa'IIdooyin Badan Leh:

http://www.allahsquran.com

http://www.quranexplorer.com

http://www.islamhouse.com

http://www.edialogue.org

http://www.islamreligion.com

http://www.newmuslimguide.com

http://www.guidetoislam.com/en/

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay”.


Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:

أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا رسول الله

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.






GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM

Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب الإجابة عن تساؤلات البشرية الحاسمة باللغة الصومالية